Uppsala kommun

# Kala shaqaynta waalidka mas`uulka ka ah carruurta – carruurta maslaxadooda

Hab-raaca dugsiyada xannaanadda carruurta ee degmada
Maay 2020



Manhajka waxbarashada ee dugsiga xannaanadda carruurta waxaa ku xusan in dugsiga xannaanad-da carruurta uu kaalin ka gesyto horumarinta carruurta, taasoo u suur-tagelin doonto in marka ay waynaadaan ay noq-daan carruur firfircoon, hal-abuur leh, karti iyo xilkasnimo leh.

# Hordhac

Caruurtu waxay u baahan yihiin dadka waawayn. Dad waawayn oo taageero, dhiirigeliyo, xilkasnimo u muujiyo oona caawinno. Dadka waawayn waa inay muujiyaan rajo wanaagsan iyo hab dhaqan nidaamsan. Waa fikradaha asaasiga ee hab-raaca oo ku qoran dugsiyada xannaanadda carruurta ee Degmada Uppsala, oo ku saabsan qaabka maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska laga doonayo in ay u wada shaqeeyaan.

Waxaan ogsoon nahay in wada-shaqaynta maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska ay muhim u tahay barashada iyo horumarinta carruurta. Maamulka dugsiga xannaanadda waxay carruurta hordhigaan loolan waawayn iyo kuwa yaryar ba. Aqoonta waa in lagu guulaystaa,

Caqabadaha waa in xal loo hela, sidoo kale iska hor imaadyada waa in la maareeyaa, kartida waa in la horumariyaa iyo isdhexgallada waa in ay yihiin kuwa ixtiraam ku salaysan.

Caqabadahaas dartood waxay carruurtu u baahan yihiin caawinaadda dadka waawayn. In si wadajir ah loo wada shaqeeyo waa lagama maarmaan.

Wada-shaqaynta aadka u wanaagsan, waxay u baahan tahay in biloowgaba, ay ku qeexan tahay mas`uuliyadda qof kasta saaran, sida qaabka ay u egyihiin iyo qodobada laga wada shaqayn doono in la isla meel dhigo. Markaas ayaa la dhaqangelin karaa wada  sha- qaynta – maslaxad carruurta ugu jirto ama u roon.

# Ujeeddooyinka wada-shaqaynta dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska

In dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska:

- U wada-shaqeeyaan qaab isku dhowaasho iyo kalsooni ku salaysan.
- In la is caawiyo waxay abuurtaa xaalad wanaagsan oo dugsiga xannaanadda ay carruurtu ka helaan wakhti horumar iyo waxbarasho leh.
- Ku dadaalaan helida garasho midaysan oo xiriir la leh ujeedada iyo hadafka dugsiga xannaanadda carruurta.
- Waxay ka taageertaa carruurta habka ugu wanaagsan ee dhinaca waxbarashadooda iyo horumarintooda, si guud iyo mid shaqsi.

# Mas`uuliyad iyo rajooyinka

Mas`uuliyadda dugsiga xannaanadda carruurta, si cad ayay ugu qeexan tahay sharciyada dugsiyada iyo manhajka waxbarshada. Maamulaha dugsiga ayaa u xilsaaran hagida iyo qaybinta shaqada. Go`aanada iyo qaabka shaqada dugsiga xannaanadda u gaari lahaa hadafkiisa waxaa leh dugsiga xannaanadda.

Xeerka waalidiinta waxaa ku xusan in waalidku mas`uul ka yahay barbaarinta iyo horu- marinta carruurtiisa.Dugsiga xannaanadda wuxuu kabayaa qoyska, wuxuuna kaalin ka geystaa in carruur kasta helo fursad horumar weyn leh. Waa in shaqada dugsiga xannaanadda ay noqotaa mid dhex marta iskaashi iyo wada shaqayn qoyska carruurta.

## Mas`uuliyadda dugsiga xannaanadda

- In xiriir joogta ah lagula socdaa horumarinta iyo waxbarashada carruurta.
- In haddii loo baahdo si dhaqsiya ah loola xiriiraa waalidka masuulka ka ah carruurta.
- In waalidka carruurta sannadkii hal mar la siiyo fursad ah helida wadahadalka horumarka waxbarashada ardayga.
- In waalidka carruurta la siiyo warbixinta hadafka dugsiga xannaanadda.
- In waxbarashada dugsiga xannaanadda ay ku salaysan tahay manhajka waxbarashada.
- In waxbarashada dugsiga xannaanadda noqoto mid kala duwanaansho leh iyadoo la waafajinayo baahida iyo waxa ay ilmaha xiiseeynayaan.
- In waalidka laga taageero dhinaca mas`uuliyadda barbaarinta iyo horumarinta carruurta.
- In waalidka la siiyo wixii warbixin ah oo xiriir la leh isbeddelada dugsiga xannaanadda, taas oo muhiim u leh sii wadista barashada iyo horumarka ubadkiisa.
- In waalidka la siiyo fursad ah inay saamayn ku yeeshaan kana qaybgalaan tayada shaqada barashada ee dugsiga xannaanadda carruurta.

## Rajooyinka uu dugsiga xannaanadda carruurta ka leeyahay waalidka

- In uu muujiyo mas`uuliyadda ka saaran barbaarinta iyo horumarinta ilmaha.
- In haddii loo baahdo uu la xiriiro shaqaalaha dugsiga xannaanadda carruurta wax alle wixii xiriir la leh ubadkiisa.
- In uu dhegta u dhigo warbixinta dugsiga xannaanadda carruurta ee ku saabsan waxbarashada iyo horumarinta ubadkiisa.
- Inuu ka qaybgalo shirarka iyo wadahadallada dugsiga xannaanadda
- Inuu hubsado in dugsiga xannaanadda uu haysto macluumadka saxda ah ee waalidka masuulka ka ah carruurta

# Qaababka iyo qodobada wada-shaqaynta ay ka kooban yihiin

Wada-shaqaynta maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska waxay ka kooban yihiin warbixin iyo wadahadal qaabab kale duwan leh. Iyadoo kuwaasi la adeegsanayo waa inaan si wadajir ah u muujino xilkasnimo wada-shaqayn taas oo ilmaha maslaxad ugu jirto .

## Warbixin

Wixii macluumaad cusub ama is- beddelada cusub ah, wuxuu waalidku ka helayaa xiriirmaalmeedyada uu la yeesho dugsiga xannaanadda iyo bogga digitalka ku salaysan ee [Unikum], tusaale ahaan warqadda toddobaadlaha ah ama bil kasta ah(ka aqriso halka hoose ee [Uni- kum]). Warbixin kasta ee dugsiga xannaanadda waxaa laga aqrisan karaa barta internetka ee dugsiga xannaanadda. Warbixin ku saabsan hagida iyo hawlaha dugsiga xannaanadda waxaa laga aqrisan karaa barta internetka ee Degmada uppsala.se.

## Wadahadalka hordhaca ah

Wadahadalka hordhaca ah ee lala yeelanayo carruurta ayaa ah in dugsiga xannaanadda uu ogaado haddii carruurtu ay leeyihiin wax khibrad ah.Hadafka wadahalka ayaa ah in dugsiga xannaanadda uu si wanaagsan u buuxiyo baahida carruurta. Ulajeedada wadahadalka ayaa waxay tahay in la hirgeliyo xiriirka wanaagsan ee qoyska, la siiyo waalidka warbixin ku saabsan wax barida wax ku oolka leh ee dugsiga xannaanadda, aragti wada- shaqaynta qoyska iyo warbixin ku saabsan arrimaha noolol-maalmeedka ilmaha ee dugsiga xannaanadda. Wadahadalka waxaa la qaban doonaa markii ilmaha ay bilaabayaan dugsiga xannaanadda . Maamulka dugsiga xannaanadda ayaa wadahadalka ugu yeeri doona waalidka masuulka ka ah carruurta.

## Wadahadalka qorshaha horumarinta waxbarashada ardayga

Wadahadalka horumarinta waxbarashada ardayga [Utvecklingssamtal] waa kulan lagu casuumo waalidka  kaas oo ku saabsan ubadkiisa. Waa wadahal u dhexeeya dugsiga xannaanadda iyo waalidka oo ku saabsan farxadda ilmaha, horumarkiisa iyo waxbarashadiisa markii ay dugsiga ama dibadiisa ku sugan yihiin. Wadahadalku wuxuu kaalin ka geystaa aqoonta carruur kasta, arrimaha laga hadlo waa xannanadda,-ciyaar-carruureed iyo waxbarasho.

## Unikum, waa bar kulan oo dijital ah

Dhammaan dugsiyada xannaanadda carruurta oo ay dowladda hoose leedahay, waxay isticmaalaan bogga digitalka ee loo yaqaanno [Unikum]. Ulajeedada bogga internetka laga leeyahay ayaa waxay tahay in sare loo qaado fursadda dabagalka horumarinta iyo waxbaras- hada.Tan kale, waa in ay fududaysaa is-gaarsi-inta iyo wadashaqaynta ka dhaxaysa maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska.

## Goobta wadatashiga

Dugsi-xannaaneed kasta wuxuu leeyahay hal ama dhawr goobood wadatashi ah oo waalidka masuulka ka ah carruurta loogu talagalay. Shaqada ugu waawayn ee goobta waxaa weeyaan in ay noqoto goob waalidka uu ka soo gudbin karo wixii talo- siin iyo aragti ah oo xiriir la leh arrimo kala duwan. Arrin gooni ah oo quseeysa shaqsi carruur ah, waalid ama shaqaale ah midna loogama hadli karo iyadoo goobtaan



la adeegsanaayo.. Wadatashigu wuxuu noqon karaa arrin xiriir la leh go,aanada soo socda kuwuu saameeyo.

Tusaalaha golaha:

- kulamada warbixinta iyo shirka waalidiinta, halkaas uu maamulka dugsiga xannaanadda kaga warbixinayo hawlahiisaa, waalidka masuulka ka ah carruurta wuxuu soo jeedin kara talooyin iyo aragtiyo arrimo kala duwan ah.
- Meelo sida qaxwo ama shaah lagu cabbo, goob albaabka u furan oo xaflado ka jiraan oo ayna jirto fursad su`aallo lagu waydiiyo, laguna soo bandhigo aragti iyo fikrado.

## Maaraynta walwalka iyo caabashooyinka

Haddii waalidka masuulka ka ah carruurta uu ka walwalsan yahay xaaladda ubadkiisa ee dugsiga xannaanadda carruurta, waa in marka hore uu la xiriiraa shaqaalaha dugsiga xannaanadda carruurta, marka ku xigtana maamulaha dugsiga. Haddii walwalka iyo aragtida ay ku saabsan yihiin hawlaha dugsiga, waa in marka hore lala xiriiraa maamulaha dugsiga.

Aragtidaada iyo caabashadaada waxaa kaloo ku soo gudbin kartaa adigoo adeegsada barta internetka ee Degmada Uppsala uppsala.se.

# La socoshada iyo horumarinta

Wada-shaqaynta wanaagsan ee maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska ma ahan oo kaliya rabitaanka, hadafka, qay- bsashada mas`uuliyadda iyo qaabab hirgalay. Waxaa dhici karto in ay u baahan tahay in la horumariyo oo la sii hagaajiyo. Sidaas awgeed,

waa arrin muhim ah in uu jiro la socosho xiriir la leh sida maamulka dugsiga xannaanadda carruurta iyo qoyska ay la tahay wada-shaqaynta iyo dabagalku uu horseedi karo sii wanaajinta talaabooyinka horumarinta.

## Hordhaca la socoshadiisa

Waxaa muhim ah in ilmaha iyo waalidka masuulka ka ah carruurta ay ku faraxsan yihi- in dugsiga xannaanadda. Sidaas awgeed, dugsiga xannaanadda carruurta wuxuu rabaa in uu ogaado aragtida waalidka ay ka qabaan hordhaca hore iyo sida xilliyadii ugu horeeysay dugsiga xannaanadda carruurta uu ahaa. Maamulka dugsiga xannaanadda waxaa ka xilsaaran in ilmo kasta uu ka helo biloow wanaagsan dugsiga xannaanadda carruurta ayadoo wadashaqayn kala dhaxayso waalidka masuulka ka ah carruurta. La socodkan hordhaca ahi wuxuu maamulka dugsiga xannaanadda carruurta u suurtagelinaya horumarinta shaqadiisa.

## Qoraal-waydiimeedka loogu talagalay waalidka carruurta

Maamulka arrimaha waxbarashada wuxuu sannad kasta hal mar waalidka masuulka ka ah carruurta u soo diraa qoraal-waydiimeedka.

Qoraal-waydiimeedka waxaa ku qoran su`aallo xiriir la leh aragtida waalidka masuulka ka ah carruurta ay ka qabaan xaaladda ubadkooda uu dugsiga xannaanadda kaga sugan yahay, iyo xitaa su`aallo ku saabsan sida ay tahay wada-shaqaynta ka dhaxayso maamulka dugsiga xannaanadda iyo qoyska.

Kaddib jawaabaha waalidka ayuu maamulka dugsiga xannaanadda carruurta uu dabagal iyo falanqayn ku sameeyaa. Kaddib maamulka dugsiga xannaanadda waxaa waajib ku ah in tallaabo uu ka qaado sidii wax looga qaban la-

haa waa haddii loo baahdo. Waalidka masuulka ka ah carruurta waxaa kaddib la siiyaa warbixin afka ah ama qoraal ah oo xiriir la leh natiijada qoraal- waydiimeedka, falanqaynta iyo haddii wax tallaabo laga qaaday. Jawaabta su`aallaha qoraal-waydiimeedka ku qoran waxay muhim u tahay shaqada iyo la socodka horumarinta dugsiga xannaanadda carruurta.

**Iyadoo la adeegsanayo wadahadal wanaagsan oo ka dhexeeya laba dhinacba, waxaan si wadajir ah u siin karnaa carruurta xaaladaha ugu wanaagsan oo ay ku horumari karaan waxna ku baran karaan markii ay ku sugan yihiin guryahooda iyo dugsiga xannaanadda carruurta.**

**Degmada Uppsala**
Maamulka waxbarashada
utbildningsforvaltningen@uppsala.se

Xafiiska arrimaha waxbarashada kaddib markii uu la tashtay siyaasiyiinta, waalidiinta carruurta iyo shaqaalaha dugsiyada xannaanadda carruurta, ayaa qaar kamid ah qodobada hab-raaca laga soo qaatay Degmada Södertälje.